

Wax-ka-beddello lagu sameeyey tallaabooyinka aageed ee degmooyin ka tirsan Viken

**Heerka faafidda cudurka ee gobolka Viken weli hoos ayuu u sii socdaa, laakiin degmooyinka qaar ayay faafidda cudurku weli sarraysaa. Dawladdu waxa ay go'aamisay in ay wax-ka-beddello ku samayso tallaabooyinka aageed. Labo degmooyin ayaa weli ku sii jiraya tallaabooyinka heerka B, afar degmooyin ayaa heerkooda hoos loo dhigayaa oo loo beddellayaa tallaabooyinka heerka C, halka saddex degmooyin laga saarayo nidaamka. Wax-ka-beddelladani waxa ay dhaqangalayaan saqda dhexe, habeenka sabtida 22-ka May.**

- Waxa soo roonaanaysa xaaladda faafidda cudurka ee degmooyinka Viken ee hoos yimaada tallaabooyinka aageed. Si kastaba degmooyinka qaarkood ayaa faafidda cudurku weli sarraysaa, taasoo keenaysa in ay weli ku sii jiraan tallaabooyinka heerka B, halka afar degmooyin u wareegi karaan heerka C oo ka hooseeya. Saddexda degmooyin ee laga saarayo nidaamku waxa ay durba bilaabeen inay isu duwaan tallabooyinkooda heerka degmo ah, oo la mid ah kuwa tallabooyinka heerka C, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Agaasinka Caafimaadka, Machadka Caafimaadka Dadweynaha, Guddoomiyaha Gobolka Oslo iyo Viken iyo degmooyinka ay khuseyso ayaa wadhadallo ka yeeshay arrintan.

Dawladdu waxa ay go'aamisay in degmooyinkan soo socda ku sii jiraan tallaabooyinka heerka B (heer tallaabooyin oo adag) ilaa iyo 25-ka May:

- Lørenskog
- Ullensaker

Cinwaan: [Tallaabooyinka heerka B \(Heer tallaabooyin oo adag, ku salaysan xeer-hoosaadka covid-19 cutubka 5B\)](#)

Dawladdu waxa ay go'aamisay in degmooyinkan soo socda laga beddello tallaabooyinka heerka B oo la hoos geeyo tallaabooyinka heerka C (heer tallaabooyin oo in badan adag) ilaa iyo 25-ka May:

- Lillestrøm
- Nordre Follo
- Rælingen
- Ås

Cinwaan: [Tallaabooyinka heerka C \(Heer tallaabooyin oo in badan adag, ku salaysan xeer-hoosaadka covid-19 cutubka 5C\)](#)

Degmooyinkan soo socda ayaa laga saarayaa nidaamka tallaabooyinka aageed laga bilaabo 22-ka May, laakiin waxay soo rogi doonaan tallaabooyin u gaar ah oo isu duwan oo la heer ah tallaabooyinka heerka C:

- Bærum
- Drammen
- Lier

### **Faahfaahin ku saabsan tallaabooyinka aageed**

Dawladdu waxa ay go'aamin kartaa nooca tallaabooyinka lagu soo rogayo degmo iyo degmooyinka ku xeeran marka ay lagama maarmaan u tahay in tallaabooyinka ka hortagga cudurka loo hirgeliyo si degdeg ah oo isuduwan si looga hortago faafidda cudurka.

Heerka tallaabooyinka ee loo dooranayo degmo waxa ay ku xidhan tahay sida ay xaaladda faafidda cudurku u daran tahay. Waxa la isticmaali karaa saddex heer oo tallaabooyin ah.

Waa tallaabooyinka heerka A (heer aad u adag), tallaabooyinka heerka B (heer adag) iyo tallaabooyinka heerka C (heer xoogaa adag).

[Halkan ayaad ka arki kartaa tallaabooyinka kala duwan ee hoos imanaya heeerarka kala duwan](#)